WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2020

# AF-SOOMAALI

2020

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

## QEYBTA 1 AAD:

## Naxwaha Af-Soomaaliga (40 Dhibcood)

**Goobo geli jawaabta saxda ah:**

1. Naxwaha af-Soomaaligu wuxuu u kala baxaa:
   b. 2 qaybood  t. 4 qaybood  j. 3 qaybood  x. 6 qaybood

2. Ereyga 'nin' waa tilmaame qof kali ah. Rag ka badan hal qof, waxaa lagu tilmaamaa:
   b. niman  t. nimo  j. nimanyaalo  x. nin

3. Erayga 'malab' wuxuu ka koobanyahay:
   b. 2 xubnood  t. 3 xubnood  j. 1 xubin A  x. 4xubnood

4. Magac-u-yaal waxaa loo isticmaalaa halkii laga isticmaali lahaa:
   b. Sifada  t. magaca  j. falkaabka  x. falka

5. Shardileey waa labo weerood oo la isu geeyay oo:
   b. kala madaxbanaan  t. isku xiran  j. isleh  x. isku macno ah

6. Cali wuxuu **aaday** suuqa shalay. Falka aaday waa fal:
   b. ahaansho  t. ma gudbe  j. gudbe  x.gargaare

7. Weeraha soo socda middee si saxan loo astaameeyay?
   b. anas waa arday.  t. Maanta waa Talaado.
   J. Maxaa dooneysaa.  x. Aniga ayaa arkay

8. Magac-u-yaalka 'isaga' marka la tilmaamayo wadartiisa ama dad ka badan hal waa:
   b. iyaga  t. innaga  j. idinka  x. iyada

9. Dhameystir shardileydan: Hadduu wax barto,
   b. wuu shaqeystaa  t. wuu shaqeysan lahaa
   j. wuu shaqeysan doonaa  x. wuu shaqeyay

10. Marka shay laga hadlayo, heerarka kala duwan waxaa lagu tilmaamaa:
    b. Sifo Xulasho  t. Sifo caadi  J. Sifo is-barbardhigx. Sifo dahsoon

11. Sifada is-barbardhigeed ee erayga geesi waa:
    b. Ka geesisan  t. Ka geesan  j. Geesinimo  x. Geesi ah

12. Ardaydu waxa ay aadeen dugsiga. Falka 'aadeen' waa fal:
    b. Tagay  t. Jooga  j. Soo socda

13. Meeleey waxaa loo isticmaalaa ka hor:
    b. magaca  b. xiriiriye  j. fal  x. sifo

14. Cad iyo caano ayaa la igu casuumay. Xiriiriyaha weertaan kujira waa:
    b. ayaa  t. iyo  j. la igu  x. cad





☞ www.somexams.com  info@somexams.com  © In cooperation with www.qalinqaad.com

15. Kalluunka ayuu jecel yahay. Magac u yaalkee ku qarsoon jumladaan?
    b. Iyagu t. Innagu j. Isagu x. Iyadu.
16. Erayada soo socda midkee ayaan ahayn magac?
    b. Tagay t. buug j. guri x. libaax
17. Faadumo waa ardayad. Falka kujira weertan waa fal:
    b. ahaansho t. tagay j. jooga x. gudbe
18. Joogsiga waa astaan ladhigo:
    b. bilowga t. dhammaadka j. dhexda x. korka
19. Falkaabku waxa uu warbixin buuxda ka bixiyaa:
    b. Falka t. magaca j. meeleeye x. magac-u-yaalka
20. Erayada soo socda midkee ayaan ahayn xiriiriye?
    b. Muuse t. mise j. ka dib x. iyo

**<u>Qebyta 2aad: Erayo</u> (30 dhibcood)**

**Su'aasha 21 ilaa 35 Dooro jawaabta saxda adiga oo galinaya goobaabin:**

21. Gabayga Waa Duni waxaa curiyey abwaan:
    b. Cubdullaahi Suldaan Tima Cadden t. Raage Ugaas
    j. Xaaji Aadan Axmed Af-Qalooc x. Maxamuud Cabdullaahi Sangub
22. Magaalada Muqdishu waa:
    b. Beel t. Tuulo, j. Degmo x. Caasimad
23. Ereyga xaas, waxaa kale oo loo yaqaan:
    b. oori t. gabar j garoob x. gashaanti
24. lidka erayga gaajo waa:
    b. Dan t. oon j. dhereg x. harraad
25. Geelu waxa uu leeyahay dhawaq gaar ah oo loo yaqaano:
    b. Oror t. Olol j. orod x. horin
26. Waxyaabaha loo adeegsado geela waxaan ka mid ahayn:
    b. rarasho t. hilibkiisa lacuno j. magta lagu bixiyo x. ceel qodis
27. Erayga talantaalli micnihiisu waa:
    b. kala hor marin j. kala tagid j. Isfahan x. isweydaar
28. Erayada dhexmara labo dhinac iyo in ka badan waa:
    b. wada sheekeysi t. dagaal j. wadahaladal x. wada shaqeyn



2

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

29. Gabayga Qabyaalad waxaa curiyay:

b. Sayid Maxamad Cabdulle Xassan
t. Abshir Nuur Faarax( Bacadle)
j. Xaaji Aadan Af-Qallooc
x. Ismaciil Mire

30. Lidka erayga gudcur waa:

b. mugdi t. iftiin j. madow x. cagaar

31. Faa'iidooyinka sabirka waxaa ka mid ah:

b. welwel t. xamaasad j. xasillooni x. wareer

32. Micnaha erayga 'boor' waa:

b. beer t. dhiiqo j. dabeyl x. habaas

33. Labka lo'da waxaa loo yaqaanaa:

b. sac b. wan j. qaalin x. dibi

34. Derisku waa in uu is:

b. dilo t. xanto j. dhibo x. ixtiraamo

35. Dhammeystir maah-maahdan: Soor nin yimid baa leh, sagootinna nin:

b. tegayaa b. soo socdaa j. guursanayaa x. jiifa

**<u>Qeybta 3 aad: Sheeko</u> (30 dhibcood)**

**<u>Ka jawaab su'aalaha 36-50 adiga oo goobo galinaya jawaabta saxda ah.</u>**

'Dood' waa wadahadal dhexmara laba dhinac ama in ka badan taas oo ku saabsan mawduuc gaar ah. Barashada qaabka looga qeyb qaato doodaha waxa ay ku hoggaamisaa ardayga in uu ka fogaado buuq, caro, aflagaado iwm. Dooduhu waa qayb ka mid ah hababka ardaydu ay ku tababaran karaan si ay u xakameeyaan hadalladooda marka ay ka qayb galayaan doodaha. Waxa ay ku dhiiri galisaa ardayda in ay abuuraan mawduucyo, bartaan qiimaha xirfadda wadahadlka, kuna noqdaan codkar. Doodi waxa kale oo ay kor u qaaddaa si wanaagsan u soo bandhigidda ra'yiga qofka, iyo in qofku noqdo dhegeyste fiican.

Dhinaca kale, dooddu waxa ay galisaa arday kalsooni xagga hadlka iyo ummad hor istaagga. Marka la qabanayo dood fasalka dhexdiisa ah, ugu horeyn waxaa la dooranayaa guddi maamula doodaha iyo mawduucyo ku habboon ardayda. Dhunacyada doodaya waxa laga rabaa in ay diyaargarobaan, isla markaasna ilaaliyaan anshaxa udagsan dood sida in codadka kor loo qaado, in la istixgaliyo, in la ilaaliyo waqtiga koox waliba loo qoondeeyay. Waa in aan doode socsocon xilliga doodda, kuna sugnaado kursiga loo cayimay. Labada dhinac mid waliba waxaa laga rabaa in ay sababeeyaan diidmadooda ama raacidooda ee ra'yi la soo bandhigay. Gabagabada doodda waxaa dhibcaha ugu badan la siinayaa kooxda sababeyntooda aad ay u wanaagsaneyd.



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

36. Mawduuca doodda waxa uu kuyimaadaa:
    b. amarka ardayda    t. soo jeedinta ardayda
    j. qoraal xafiiseed    x. rabitaanka mid kamid ah ardayda.

37. Doodda waxaa daadihiya:
    b. qofkii raba    t. qofka hadalka badan    j. dhageyste    x. guddi

38. Inta ay dooddu socoto qof waliba waa in uu:
    b. socdaa    t. fariistaa    j. taagnaada    x. doodaa

39. Guddi doodeed hawshiisu waa:
    b. qorista doodda    t. gabagabeynta    j. soo jeendinta    x. hagidda doodad

40. Ka qayb galayaasha doodda waa in cod koodu:
    b. hooseeyo    t. dheer yahay    j. macaan yahay    x. dhagajabis yahay

41. Barashada qaabka dood waxa ay ardayga ka caawisaa:
    b. dhaqanka doodda    t. dagaalka    j. aamusnaanta    x. runta

42. Cod kar micnihiisu waa:
    b. afgaaban    t. buuq badan    j. afxun    x. aftahan

43. Dooduha waxa laga bartaa:
    b. daawadenimo    t. dhegeystenimo    j. macallin    x. Aftahamo

44. Mawduuca dood waa in ay ahaataa mid:
    b. furan    t. gaar ah    j. aan la fahmi Karin    x. adag

45. ka qaybqaadashada dood waxa ay arday ku abuurtaa:
    b. cabsi    t. kalsooni    j. xishood    x. anshax xumo

46. Daadihiyaha dood waxaa dooranaya:
    b. shacabka    t. ardayda    j. macallimiinta    x. Waalidka

47. Micnaha erayga 'cayiman' waa:
    b. mugdi ah    t. gaar ah    j. dheer    x. la garaneyn

48. Dhibcaha ugu badan waxaa la siinayaa kooxda sababeyntoodu:
    b. ugu wanaagsan tahay    t. ugu dheertahay
    j. ugu hooseyso    c. ugu adkeed

49. Koox waliba hadalkeeda waxaa uruurinya:
    b. macallinka    t. ardayda    j. daadihiyaha kaliya    x. guddiga

50. Dood waxaa lagu bartaa:
    b. qoridda    t. akhriska    j. wax sameynta    x. cod karnimo